## AFEEFTA MAREEGTA

### Shuruudaha Adeegsiga

Adeegsigaaga mareegtan ee Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta waxay ka dhigan tahay inaad akhriday oo aad fahantay shuruudaha iyo xaaladaha hoose, iyo in aad aqbashay in aad raacdo. Haddii aadan oggolaanin inaad raacdo shuruudahan iyo xaaladahaan, ma isticmaali kartid mareegtan. Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta wuxuu xaq u leeyahay, si ikhtiyaarkiisa ah, in uu beddelo, wax ka beddelo ama si kale wax uga beddelo shuruudahan iyo xaaladahaan wakhti kasta, iyada oo aan lagugu soo wargelin. Waa inaad si joogto ah u eegtaa shuruudaha iyo xaaladaha soo socda si aad ula socoto wax kasta oo isbeddel ah.

### Afeef

Mareegtani waxaa loogu talagalay ujeeddooyin xog-ogaalnimo oo keliya. Ma loogu talogalin, mana ku siinayso, talo gaar ah oo maaliyadeed, sharci, ama caafimaad. Dheefaha uu bixiyo Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta waxaa xukuma qodobbada gaarka ah ee Dukumiintiga Qorshe kasta iyo sharciyo iyo xeerar badan, dhammaantoodna waa kuwo adag oo laga yaabo inay isbeddelaan. Sidaas darteed, inkastoo aan isku dayno inaan macluumaadka ku jira mareegtani ka dhigno mid cusub oo sax ah sida ugu macquulsan, macluumaadka noocan ah iyo ilaha macluumaadka waxay isbeddeli karaan wakhti kasta. Sidaa darteed, fadlan ogow in:

- Haddii ay jiraan wax is-waafajin la'aan ah oo u dhexeeya Dukumiintiyada Qorshaha iyo mareegtani, Dukumiintiyada Qorshaha ayaa mudnaan leh.
- Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ma dammaanad qaadayo saxnaanta, isku halaynta ama dhamaystirnaanta macluumaadka ku jira mareegtani.

Marka aad go'aanno ka gaareyso dheefahaaga, waxaa laga yaabaa inaad tixgeliso inaad hesho talo caafimaad, maaliyadeed, iyo sharci oo madax-bannaan.

Wax dammaanad nooc kasta ah (ha ahaato mid cad, maldahan, ama sharci) laguguma siinayo wax la xiriira macluumaadka lagugu siiyay mareegtani ama wax la xiriira habka lagugu soo gudbiyo adiga iyadoo loo marayo Intarneedka. Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta iyo Guddiga Ammaanada mas'uul kama noqon doonaan waxyeelooyinka, khasaaraha, qiimayaasha ama qarashaadka ka dhasha adeegsiga ama waxqabadka mareegtani, xitaa haddii Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ama Guddiga Ammaanada lagula taliyay suurtogalnimada waxyeelooyinka noocaan ah.

### Isgaarsiinta Iimeylka iyo Intarneedka

Isgaarsiinta iimaylka la isku dhaafsado intarneedka iyo shabakadaha kale ee si guud loo heli karo ma aha mid ammaan ah. **Macluumaad kasta oo aad ku soo dirto iimayl waxaa laga yaabaa in ay lumaan, dhexda loo galo ama wax laga beddelo inta la gudbinayo.**

Haddii aad doorato inaad macluumaad u dirto Xafiiska Sanduuqa adigoo ugu soo gudbinayo iimayl ama u soo marinayo intarneedka, wixi khatar ah oo sidaas ka yimaada adiga ayaa dusha saaranaya. Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta iyo Guddiga Ammaanada ma qaadanayaan wax mas'uuliyad ah oo ku aadan waxyeelada aad la kulmi karto, ama kharashaadka aad gasho, oo ka dhasha dirista macluumaadka adigoo isticmaalaya iimaiy ama, haddii aad codsato, sabab ah Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta oo macluumaad iimayl kuugu soo dira. Tani waxaa ku jira iimayl kasta oo noocaas ah oo laga yaabo inuu ku jiro macluumaadkaaga gaarka ah ama wax sir ah.

### Siyaasadda Asturnaanta Sirta

Ma jiro wax macluumaad shaqsi ah oo laga ururiyo booqdayaasha mareegtani. Si kastaba ha ahaatee, Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta wuxuu soo ururiyaa oo uu falanqeeyaa macluumaad gaar ah oo aan mid shakhsi ahayn oo ku saabsan adeegsiga mareegtan ee dhammaan booqdayaasha. Xogtan waxaa loo isticmaalaa si wadar ah si looga caawiyo Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta in uu go'aamiyo hababka guud ee isticmaalka iyo si loo hagaajiyo qaabka iyo shaqeynta mareegtani. Adeegsiga barta iyo xogta tirakoobyada noocaas ah waxaa laga yaabaa in loo gudbiyo dhinacyo saddexaad oo uu Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ikhtiyaarkiisa u go'aamiyo.

### Ku Lifaaqsanaanta Mareegaha Kale

Lifaaqyada ama tilmaamaha ku xiran mareegaha kale waa adeeg adiga laguu sameeyay oo waa inaad ku isticmaashaa adigoo wixi khatar ah qaadanaya. Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta ma taageero wax mareeh ah in lagu xiro mareegtan, ama waxa ku jira, sinnaba.

### Shuruudaha Adeegsiga / Afeef

Wadaagista Xogta Xiriirka iyadoo la oggol yahay shuruudaha adeegga iyo siyaasadda asturnaanta xogta, waxaad ogolaatay in Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta uu xogtaada xiriirka la wadaago Barnaamijyada Sanduuqa ee ay heshiiska la galeen Guddiga Ammaanada.

### Xuquuqda Daabacaadda

Dhammaan macluumaadka ku jira mareegtani waxaa lagu ilaaliyaa sharciyada xuquuqda daabacaadda ee Maraykanka iyo waddamo kale. Macluumaadka ku jira mareegtani waxaa loo koobiyeyn karaa kaliya isticmaal shaqsi ahaaneed. Dib u soo saar kasta oo laga sameeyo macluumaadka ku jira mareegtani iyada oo aan si cad loogaga helin oggolaansho qoraal ah Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta waa mamnuuc sharci ahaan. Xog kasta oo maaliyadeed ah oo ku jirta mareegtani waa xog aan rasmi ahayn mana la cuskan karo. Noocyada rasmiga ah ee warbixinaha maaliyadeed waxaa laga heli karaa Sanduuqa Caafimaadka iyo Daryeelka Shaqo Bixiyayaasha iyo Shaqaalaha ee Huteelada Magaalo-Weynta.